

## Imisa ayey baaristu ku kacaysaa?

Waxaa jira wax-ka-dhimis medicare-ka ah oo loogu talagalay baarista dhiigga, si kastaba ha ahaatee, taas ma kaafinayso kharashka baarista oo dhan. Waxaa jira kharashyo waaweyn ee iskaanka altarasoondka ah. hay'adaha gaar ahaaneed ayaa loo baahan yahay in lagala xiriiro arrimaha kharashyada.

## Sidee baan ku heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baaristan?

Waxaad kala hadli kartaa arrimahan dhakhtarkaaga.

Haweenka qaarkood ayey dhacdaa inay uga fakaraan arrimahan si walaac badan. Haddii aad uga baahan tahay caawimaad wax ka qabashada walwalka iyo walaaca ku saabsan baaristan, fadlan la hadal dhakhtarkaaga.

Intaas waxaa raaca, Haya'dda Genetic Health Services Victoria, waxay bixisaa adeegga macluumaadka iyo la-talinta oo ku saabsan baaristan:

- Macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan baaristan laftigeeda
- Caawimaad si loo fahmo saamaynta baarista
- Caawimaad si loo tarjumo natiijooyinka.

### Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir:

MATERNAL SERUM SCREENING  
Genetic Health Services Victoria  
Royal Children's Hospital  
Flemington Road  
Parkville, Victoria 3052  
Taleefanka (03) 8341 6356 ama 8341 6357

Lamabar taleefan oo kale oo waxtar badan:  
DOWN SYNDROME ASSOCIATION  
Taleefanka (03) 9486 9600  
Website-ka: [www.vcgspathology.com.au](http://www.vcgspathology.com.au)

### Sida uu u shaqeeyo habka baaristu:

1. Uurkaaga ayaa la xaqiijiyaa waxaana muddadi caadaada kuugu dambaysey laga qiyaasaa taariikhda dhaliddaada
2. Waxaa la ballamiyaa altarasoondka marka la marayo ilaa 12 toddobaad ee uurka
3. Dhakhtarkaagu wuxuu ku siinayaa foomka baarista dhiigga ee kala-xulidda dheecaanka hooyada
4. Dhiigga waxaa si fiican loo qaadaa inta lagu jiro toddobaadka tobnaad ee uurka. Ballanta qaadidda dhiigga ayaa taleefan lagu sameeyaa 03 8341 6303.
5. Altarasoondka ayaa la sameeyaa, oo ay ku jirto cabiraadda nuchal translucency
6. Halista 'la mideeyey' ayaa la xisaabiyaa.
7. Natiijada waxaa kaala hadli doona dhakhtarkaaga
8. haddii lagaa helo natiijada 'halis sare', ikhtiyaarka in la sameeyo baaris dheeraad ah, ayaa lagaala hadli doona.



Combined First Trimester Screening - Somali

## Kala-xulidda Trimesterka kowaad ee La-mideeyey

### Baarista Kala-xulidda Down Syndrome ee qaybta hore ee uurka

Haween kastaa waxay fishaa inay dhali doonto ilmo caafimaad qaba. Badiba ilmahu waxay dhashaan ayagoo caafimaad qaba, hase ahaatee boqolkii saddex ilmood ayaa ku dhasha dhibaato taas oo daran waxayna u baahan kartaa daryeel caafimaad. Si loo caawiyo hooyooyinka Victoria in la yareeyo fursadda ay ku dhalaan ilmo iin leh waxaan bixinaa baarista kala-xulidda intay uurka leeyihiin kaas oo aad dooran karto haddaad doonaysid.

Baarristu waxay sahashaa midaynta baarista dhiigga iyo baarista altarasoondka si loogu adeegsado marxaladda hore ee uurka si loo eego haddii ilmahaagu uu halis ugu jiro inuu qabo cilladda Down Syndrome.

Xaashidan waxay ka jawaabaysaa su'aalaha badanaa lays weydiyo oo ku saabsan baaristan.

### Maxay tahay cilladda Down Syndrome?

Down Syndrome waa cillad taas oo keenta iinta caqliyeed oo kala ah heerar kala duwan waxayna keeni kartaa dhibaatooyin jidheed sida cilladaha wadnaha, ama dhibaatooyin la xiriira aragga ama maqalka. 1 ka mid ah 350kii uurba ee trimesterka kowaad waxaa saameeya Down Syndrome. Haweenka oo dhan waxay halis ugu jiraan inay dhalaan ilmo qaba Down Syndrome, in kastoo halistan ay la sii korodho da'da haweenka. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi kara halista ilmo qaba Down Syndrome oo da'daada ah.

Down Syndrome waa cillad koromosoom aan caadi ahayn. Koromosoomku waa dhismaha uu ku jiro macluumaadka hiddo-wadaha kaas oo aan u baahanahay si aan caadi ugu korno ama u hormarno. Mid kasta oo ka mid ah unugadeena waxaa ku jira 23 lammaane koromosoom. Cilladaha ka jira tirada ama dhismaha koromosoomka waxay keeni kartaa dhibaatooyin caafimaad. Down Syndrome waxaa badanaa keena ayadoo la lahaado 3 koobi ee tirada koromosoomka 21ka ah. waxaa kaloo jira cillado kale ee koromosoom oo dhif ah kuwaas o keeni kara in ilmahu ku dhasho iin.

### Maxaa ka mid ah baarista kala-xulidda ee Down Syndrome?

Baarista waxay ka kooban tahay laba qaybood:

1. Baarista dhiigga
2. Alarasoondka

Ayadoo la mideeyo natiijooyinka labada qaybood ee baarista waxaa suurtagal ah in la ogaado haddii hawentu uurka leh ay qabi karto halis sare oo ah inay dhasho ilmo qaba cilladda Down Syndrome.

**Ayada iskeed baaristu kuuma sheegayso in ilmahu qabo Down Syndrome iyo in kale. Waxay muujisaa in hawenta u baahan tahay in lagu sii sameeyo baaris dheeraad ah si loo ogaado in ilmahu uu qabo cilladdaas.**

## Qaybta 1aad: Baarista Dhiigga

Baarista dhiigga oo loo yaqaan **Baarista Kala-xulidda Dheecaanka Hooyada** (maternal serum screening – MSS) wuxuu cabiraa xaddiga laba borotiin oo kala duwan loona yaqaan PAPPa iyo beta hCG kuwaas oo si dabiici ah uga muuqda dhiigga hooyada intay uurka leedahay. Is-baddalka ku dhaca heerka borotiinadan wuxuu muujin karaa inuu jiro halis sare oo ah in ilmaha uurka ku jiraa uu qabo cilladda Down Syndrome. Hadda ka hor baaris tan la mid ah waa jiri jirtey hase ahaatee keliya waxaa la heli karey 14 toddobaad ee uurka ka dib. Natiijada lagama helo dhiigga oo keliya.

## Qaybta 2aad: Altarasoondka

Altarasoondka waxaa samayn kara altaronogarafar si gaar ah u tababaran inta u dhaxaysa 11 toddobaad iyo 3 maalmood iyo 13 toddobaad iyo 6 maalmood ee muddada uurka. Waxaa badanaa lagu sameeyaa dahaarka ubucda hase ahaatee mararka qaarkood waxaa laga maarmaan ah in la sameeyo iskaan hoose ee (siilka). Altarasoondku uma leh saamayn waxyeello la yaqaan hooyada ama ilmaha.

Altarasoondku wuxuu sahlaa cabiraadda xaddiga dureeraha ku jira maqaarka ee gadaalka dambe ee qoorta ilmaha. Cabiraadda waxaa loo yaqaan **nuchal translucency**.

Dhammaan ilmaha ku jira marxaladda uurka waxay leeyihiin xoogaa dureere ah oo uga jira halkaas, hase ahaatee celcelis ahaan ilmaha qaba cilladda Down Syndrome ama koromosoom aan caadi ahayn waxay leeyihiin xaddi weyn oo dureere ah. Haddaba cabiraadda nuchal translucency waxaa loo adeegsan karaa in lagu ogaado haddii ilmaha uu ku jiro halis sare ee cilladda Down Syndrome.

Altarasoondku wuxuu kaloo hubiyaa dhowr waxyaalood oo kale, oo ay ka mid yihiin:

- Xaqiijinta in ilmahu nool yahay
- Ogaanshaha mataanaha
- Ogaanshaha qiyaasta saxda ah ee dhalashada ilmaha
- La socodka haddii ilmaha ay ka jiraan jidh ahaan wax aan caadi ahayn oo muuqda

## Goormaa la sameeyaa baarista?

Baarista nuchal translucency waxaa la samayn karaa inta u dhaxaysa 11 toddobaad iyo 3 maalmood iyo 13 toddobaad iyo 6 maalmood ee muddada uurka (sida fiican waa 12 toddobaad). **Baarista dhiigga waa midda ugu macluumaadka badan haddii la qaado inta lagu jiro toddobaadka tobnaad ee uurka**. Si kastaba ha ahaatee waxaa la qaadi karaa inta u dhaxaysa 9 toddobaad iyo 12 toddobaad iyo 6 maalmood ee muddada uurka.

## Sidee ayey sax u tahay baaristu?

Ayadoo la mideeyo aqoonta loo leeyahay da'da haweenata, natiijooyinka baarista dhiigga, cabiraadda nuchal translucency, muddada wallaca iyo intay miisaan le'eg tahay haweenatu, ayaa baaristu muujin kartaa in 10kii uurba ay 9 ilmahu qabi karaan cilladda Down Syndrome.

**Waxaa aad muhiim u ah in la ogaado in baaristani ay keliya tahay Down Syndrome iyo in natiijada 'halis sare' aysan xaqiijinayn in ilmahu ka badbaadsan yahay cilladaha kale ee dhalashada.**

## Sidee ayaan u heli karaa natiijadayda?

Isla markii uu altaronograpgerku uu soo dhammaystiro altarasoondka cabiraadda waxaa loo fakis-gareeyaa shaybaarka MSS. Macluumaadka laga helo baarista dhiigga waxaa lala mideeyaa cabiraadda altarasoondka ayadoo natiijada kama dambaysta ah dib loogu diro altaronogarafarka. Koobiga natiijada waxaa kaloo loo gudbiyaa dhakhtarkaagii ku soo diray.

## Maxaa dhacaya haddii baaristii kala-xuliddu ay muujiso in ilmahaygu 'halis sare' ugu jiro Down Syndrome?

25kii haween ahba 1 ayaa muujin karta natiijada 'halis sare'. Taas macnaheedu runta ah maahan inay jirto dhibaato haysa ilmahaaga aan dhalan. Balse macnaheedu waa in baarisyo dheeraad ah la sameeyo si loo sii ogaado haddii ay jirto wax dhibaato ah oo haysata ilmahaaga. Badiba haweenka muujiya natiijada 'halis sare' waxay ku dambeeyaan inay dhalaan ilmo caadi ah.

Waxaa jira laba baaris daaweyn kuwaas oo la siin karo haweenka muujiya natiijada 'halis sare' si loo xaqiijiyo bal inay ilmahu qabaan ama aysan qabin cilladda Down Syndrome ama koromosoomka aan caadiga ahayn. Baarisyadaas waa chronic villus sampling (CVS) ama amniocentesis. Baarista CVS waxaa la sameeyaa ilaa 12 toddobaad halka baarista amniocentesis la sameeyo ilaa 15 toddobaad ee muddada uurka. Labada baarisba waxay bixiyaan natiijo isku mid ah ayadoo mid ama midka kale la sameeyo. Labaduba waxay leeyihiin halis yar oo dhicin ah. natiijooyinka horudhaca ah oo laga helo mid ka mid ah labadan baaris waxaa la heli karaa 48 saacadood gudahood. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baarisyadan waxaa laga heli karaa dhakhtarkaaga.

## Maxaa dhacaya haddii baaristii kala-xuliddu ay muujiso in ilmahaygu 'halis hoose' ugu jiro Down Syndrome?

25kii haween oo labaaray 24 ayaa muujin karta natiijada 'halis hoose'. Taas macnaheedu waxa weeye in halista uu ilmahu ku qabi karo cilladda Down Syndrome ay aad u hoosayso. In kastoo haweenka muujiya natiijadan aysan dhici karin inay dhalaan ilmo qaba cilladda Down Syndrome, haddana in tiro yar ah ayaa dhici karta.

## Baaristu ma muujisaa cillado dhalasho oo kale?

In kastoo baarista loogu talagalay in lagu ogaado ilmaha halista ugu jira cilladda Down Syndrome, haddana waxaa lagu ogaan karaa ilmaha qabi kara halista koromosoomka aan caadiga ahayn. Intaas waxaa raaca in altarasoondku muujin karo haddii ilmahu qabo cillad dhalasho oo jidheed oo muuqata. Haddii ay jirto wax shaki ah oo ka jira altarasoondka, waxaa la samayn karaa altarasoond dheeraad ah oo uu sameeyo altaronogarafarku muddo yar oo dhowr toddobaad ah.

## Miyey tahay in dhammaan haweenka uurka leh ay maraan baarista kala-xulidda Down Syndrome muddada hore ee uurka?

Maya. Go'aanka ah in la baaro ama aan la baarin gebi ahaanba adaa iska leh. Halkan waxaa ku yaalla dhowr su'aalood oo ay tahay inaad tixgeliso ka hor intaadan go'aansan bal inaad samayso baarista iyo in kale.

*Sidee bay cilladda Down Syndrome u saamayn kartaa ilmahayga iyo qoyskayga?*

*Maxay yihiin fursadaha uu ilmahayga ku saamayn karo?*

*Miyey tahay inaan waqti hore ogaado haddii ay jirto dhibaato haysa ilmahayga?*

*Miyey tahay inaan tixgeliyo iska-soosaarista (termination) haddii ilmahu cilladaysan yahay?*

*Baaristu muujin-mayso cilladda Down Syndrome-ka ee uurarka oo dhan, taasi ma waxbaa ku jaban?*

*Haddii baarista layga helo 'halis sare' miyey tahay inaan tixgeliyo inaan maro baarista CVS ama amniocentesis in kastoo ay jirto halis yar ee ah dhicin?*